

Maal gelinta Farshaxanka ee ay bixinayaan Gollaha Fanka Gobalka ee Bartamaha (MRAC)

Kusoo dhawoow MRAC! Waxaan ku faraxsan nahay inaad xiisaynayso barnaamijyadeena. MRAC waa urur khayri ah oo horumariya helitaanka fanka ee bulshooyinka aaggaga toddobada ah ee bartamaha degmada oo kala ah degmooyinka Anoka, Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott, Washington ayadoo loo maraayo taageerida farshaxannada iyo ururada.

MRAC waxay leedahay afar (4) barnaamij oo deeq ah:

Taageero Isbadbadalaysa: oo dhan \$15,000 oo lagu taageeraayo fanka, dhaqanka iyo ururada khayriga ah ee aan fanka qusayn, iyo kooxaha dhaqaale ahaan la maal gasho si loo abuurdo helitaanka fanka loona adeegsado fanka si loola falgalo macaamiisha iyo bulshada ku dhaqan 7 degmo ee magaalooyinka mataanaha ah ee gobalka bartamaha. Mashruuc lasoo jeediyay waa in loo sameeyaa kuwa faa'iido u leh dadka reer Minnesota. Ma jiraan lacag celin lagu doonaayo barnaamijkaan. Waqtiyada la cayimay waa 9, 2021 iyo Maarso 14, 2022.

Saamaynta Fanku Ku leeyahay Shaqsiyaadka waxay siisaa deeqo dhan ilaa \$5.000 si loo taageero mashruucyada fanka ee Magaalooyinka mataanaha ah ee 7 degmo ee gobalka bartamaha kuwaas oo ay hogaanka u hayaan shaqsiyaadka loo aqoonsado Madoowga, Asaliyiinta, ama Dadka aan Caddaanka ahayn (BIPOC); iyo/ama Naafada ah/Qof naafo qaba (PWD); iyo ama Naag qaniisad ah, Nin Qaniis ah, Qof labada Jinsiba u galmooda ah, Labeeb, Nimoow Naag, Wax walboole, Bilaa Galmo/Seenyoon, Labo Dareenle (LGBTQIA2+). Deeqdaan waxaa loogu talagalay in lagu taageero shaqsiyaadka hogaanka u ah dadaalo lagu abuurayo helitaanka bulshada ee fanka iyo/ama ku boorinta bulshada hal abuurada fanka. Mashruuc kasta waa in lagu daraa qaybta bulshada, sida jilitaanka dadwaynaha, bandhig, aqoon kororsi, ama wada hadal xog bixin ah, kuwaasoo mid kasta lagusoo bandhigi karo oonleenka. Qofku waa inuu dagan yahay 7 degmo ee magaalooyinka mataanaha ah ee bartamaha muddada deeqdu socoto. Ma jiraan lacag celin lagu doonaayo barnaamijkaan. Muddada loo cayimay waa Oktoobar 4, 2021.

Next Step Fund, waxaa maal gelisay mu'asasada McKnight Foundation, waxay siinaysaa deeqaha mashruuca oo dhan \$5,000 farshaxaniistayaasha gaarka ah ee ka shaqaynaaya hal abuurka. Mashruucyadaan waa inay saamayn ku reebaana codsadaha gaarka ah ayna abuuraaan kobcinta ama sugida shaqadiisa hal abuur. Codsadayaasha ayaa ku jiri kara heer kasta oo xirfadooda hal abuurka ah. Ma jiraan lacag celin lagu doonaayo barnaamijkaan. Mudada loo cayimay waa Janaayo 10, 2021.

Jawaabta Sinaanta Deeqda waxay siisaa maal gelin dhan illaa \$10.000 kooxaha ay hogaamiyaan badanka Dadka madow, Dadka asalka wadanka, Dadka aan caddaanka ahayn (BIPOC); iyo/ama Dadka Naafada ah (PWD), iyo/ama Khaniisad, Khaniis, Labba sinjiile, Qofka sinjigiisa beddela, Dadka aan sinji caadi ah lahayn, Labbeeb, Aan galmada dareemin/Qof aan sinji gaar ah lahayn, Labba noocle (LGBTQIA2+). Deeqdaan waxaa loo sameeyay in lagu taageero awooda kooxda ee abuurista helitaanka fanka. Dhammaan kooxaha waa inay degan yihiin mashruucyada oo dhan laga fuliyaa gobalka bartamaha ee Magaalooyinka mataanaha ah ee 7 Degmo. Ma jiraan lacag celin lagu doonaayo barnaamijkaan. Muddada loo cayimay waa Febraayo 7, 2021.

Waxaa jirta faahfaahin dheeraad ah oo lagu bixinaayo Ingiriis aadna ka helayso www.mrac.org. Haddii aad u baahan tahay qoraalo turjuman ama aad qabto wax baahiyaha helida ah, waxaan diyaar u nahay inaan ku siino hawl fududayn labo asbuuc gudahood markaad codsato. Waxaad sidoo kale la hadli kartaa Agaasimaha Barnaamijka si aad u hesho taageero dheeraad ah.

Fadlan nagala soo xiriir mrac@mrac.org.